

### **Maxkamaduhu ma furan yihiin?**

Haa, inkasta oo wax laga bedelay sida aan hawlaha u qabano. Cinwaanka Maxkamadaha furan halkan ka arag [<https://www.kingcounty.gov/courts/superior-court/locations.aspx>]. Ka hubi maxkamadda ka hor inta aadan imaan iyada oo laga yaabo in qaar badan oo dhageysiga ka mid ah lagu qabto iyada oo meel fog la kala joogo.

### **Sidee ayaa loo badbaadinayaa caafimaadka qof kasta?**

Fadlan kaga qeybgal dhageysiga maxkamadda telefoonka ama fiidoow haddii uu sidaas qaaliga ama qareenkaaga ku wargeliyo, oo diyaarso qalabka muhimka u ah ka qeybgalka. Si aad u xaqiijiso in maxkamaddu ku soo gaarsiiso xogta ugu dambaysay, fadlan la socodsii maxkamadda sida laguula soo xiriiri karo. Iimeylka shaqaalaha maxkamadda, qaaliyada, iyo xogheynta halkan kala soco [<https://www.kingcounty.gov/courts/superior-court/directory.aspx>].

Haddii aad timaado maxkamadda, waxaa lagaa doonayaa in aad xirato af dabool ama waji dabool. Maxkamadda ayaad ka heleysaan af dabool aad xirataan oo lacagla'aan ah. Lagaama doonayo in aad xirato af dabool haddii:

- La doonayo in afkaaga iyo sankaaaga aan la daboolin sababo la xiriira caafimaadka;
- Aad tahay ilmo da'diisu tahay laba sano ama ka yar;
- Aad dooneyso in la arko afkaaga waayo waxa aad tahay dhagoole ama qof maqalku ku adag yahay oo la hadlaya qof dhago la'a ama maqalku ku adag yahay; ama
- Qaaliga ayaa kuu ogolaaday in aad si ku meel gaar ah isaga furto si lagu maqli karto si wanaagsan.

Maxkamaddu waxa ay fulineysaa sharciyada kala fogeynta. Waxa aad fariisan kartaa ama istaagi kartaa oo kaliya goobaha loogu talo galay. Ha gelin dhismaha maxkamadda haddii aad xanuunsan tahay ama aad karantiin ku jirto.

Shaqaalaha maxkamadda ayaa mar kasta daawo ku nadiifinaya oosada sare ee fadhiga. Waxa aad maxkamadda ka heli kartaan daawada gacmaha lagu nadiifiyo gaar ahaan qolalka maxkamadda iyo goobaha garsoorayaasha dadweynaha.

### **Mala ii heleyaa turjubaan?**

Maxkamadda ayaa mas'uul ka ah in ay kuu hesho oo bixiso turjubaan dhageysiga maxkamadda iyo markaatiyaasha u baahan turjubaan. Turjubaanadu waxa ay caawiyaan marka qareenadu la kulmayaan macaamiishooda iyo dhageysida kala duwan ee maxkamadda iyo xaaladaha kale ee maxkamadda. Waxa kale oo ay u tarjubaan xeerbeegtida dhagaha la'a, fasalada waaalidiinta, iyo ilmaha ka maqnaada dugsiga iyo balamada shaqaalaha maxkamadda. Turjubaanada waxaa laga balansadaa

Xafiiska Adeegga Turjubaanada: <https://www.kingcounty.gov/courts/superior-court/interpreter-services.aspx>

**Sidee ayaan ku arki karaa qoraalada Maxkamadda Sare iyo diiwaanka dacwadaha?**

Xafiiska Xogheynta (<https://www.kingcounty.gov/courts/clerk/about.aspx>) ayaa mas'uul ka ah keydinta iyo maareynta diiwaanka rasmiga ah ee maxkamadaha. Barta internetka ee aad kala socon karto diiwaanka dacwadaha waa: <https://www.kingcounty.gov/courts/clerk/access-records.aspx>

---

***DACWADAHA MADANIGA AH***

---

**Dadka is matalaya :** Akhri 'Sidee ayaa Degmada King looga qabsadaa waxyaabaha aad doneyso xilligan lagu jiro COVID-19 marka aadan laheyn qareen.'

**Maxaan yeelayaa haddii aan leeyahay dacwad qoyska ah (furiin, booqashada ilmaha, lacagta ilmaha loo jaro, dib u dajinta, ama la noolaashaha ilmaha ee qoys sadexaad)?**

Tilmaamaha ku saabsan dacwadaha qoyska kala soco halkan [[Link](#)].

**Maxaan yeelayaa haddii aan doonayo in aan codsado amarka kala badbaadinta ama qof kale maxkamadda ka codsaday amarka kala badbaadinta oo liddi igu ah?**

Tilmaamaha ku saabsan dacwadaha kala badbaadinta ee dagaal qoyska dhex mara kala soco halkan [[Link](#)].

**Maxaan yeelayaa haddii ay dacwadaydu tahay amar degdeg ah (ku saarid, mas'uul ka noqosho ama dardaaran?**

Tilmaamaha ku saabsan Xaaladaha Degdegga ah kala soco halkan [[Link](#)].

---

***DACWADAHA FAL DAMBIYEDKA***

---

**Sidee ayaa ku ogaanayaa maxkamadda aan tagayo iyo goorta aan tagayo?**

- Jadwalka Maxkamadaha ee Fal Dambiyeedka waxaa lagu daabacaa bogga internetka ee Maxkamadda Sare ee Degmada King <https://kingcounty.gov/courts/superior-court/criminal.aspx>
- Haddii aad wax su'aal ah ka qabto dhageysiga maxkamadda, fadlan la xiriir qareenkaaga. Haddii ay ku difaacayaan Qareenada Dadweynaha oo aadan garaneyn sida aad ula xiriireyso, fadlan iimeyl u soo dir: [dpd@kingcounty.gov](mailto:dpd@kingcounty.gov) or phone: 206-296-7662, ama telefoonka 1-844-935-3534.

## **Xagee lagu qabtaa dhageysiga dacwadaha fal dambiyeedka ee Seattle?**

**Dhismaha Maxkamadda Degmada King** , 516 Third Ave, Seattle, WA 98104

- Dhageysiga u horeeya ee dadka xiran: Isniin-Khamiis 9:00-11:00 aroornimo Qolka E-1201
- Dhageysiga u horeeya ee dadka aan xirneyn: Isniin-Khamiis 1:00-3:00 galabnimo Qolka W-921
- Dadka xiran ee leh balan maxkamadeed: Isniin-Khamiis 1:00-4:00 galabnimo Qolka E-1201
- Dadka aan xirneyn ee leh balan maxkamadeed: Isniin-Khamiis 09:00-12:00 galabnimo Qolka W-921
- Dhageysiga xuquuqda dastuurku u ogol yahay (omnibus) ee dadka xiran Jimcaha 8:30 aroornimo-12:00 galabnimo. Qolka E-1201
- Dhageysiga xuquuqda dastuurku u ogol yahay (omnibus) ee dadka aan xirneyn: Jimcaha 8:30 aroornimo -12:00 galabnimo Qolka W-921
- Jadwalka Maxkamadaha ee qirashada dambiyada waxaa lagu daabacaa bogga internetka ee Maxkamadda Sare ee Degmada King  
<https://kingcounty.gov/courts/superior-court/criminal.aspx>
- Jadwalka Maxkamadaha ee xukumidda waxaa lagu daabacaa bogga internetka ee Maxkamadda Sare ee Degmada King <https://kingcounty.gov/courts/superior-court/criminal.aspx>

## **Xagee lagu qabtaa dhageysiga dacwadaha fal dambiyeedka ee Kent?**

**Xarunta Garsoorka ee Heer Gobol ee Maleng (Maleng Regional Justice Center)** 401 Forth Avenue North, Kent, WA 98032

- Dhageysiga u horeeya ee dadka xiran: Isniin, Talaado, Khamiis 9:00-11:00 aroornimo Qolka GA
- Dhageysiga u horeeya ee dadka aan xirneyn: Isniin, Talaado, Khamiis 1:00-3:00 galabnimo Qolka 4C iyo GA 9 :00 – 11 :00 aroornimo
- Dadka xiran & kuwa aan xirneyn ee leh balan maxkamadeed: Isniin-Khamiis 1:00-4:00 galabnimo Qolka GA
- Dhageysiga xuquuqda dastuurku u ogol yahay (omnibus) ee dadka xiran iyo kuwa aan xirneyn: Jimcaha 9:00 aroornimo-12:00 galabnimo. Qolka GA
- Jadwalka Maxkamadaha ee qirashada dambiyada waxaa lagu daabacaa bogga internetka ee Maxkamadda Sare ee Degmada King  
<https://kingcounty.gov/courts/superior-court/criminal.aspx>

- Jadwalka Maxkamadaha ee xukumidda waxaa lagu daabacaa bogga internetka ee Maxkamadda Sare ee Degmada King <https://kingcounty.gov/courts/superior-court/criminal.aspx>

---

## MAXKAMADAHA CARUURTA

---

### **Sidee ayaa ku ogaanayaa maxkamadda aan tagayo iyo goorta aan tagayo?**

Maxkamaddu ma dhageysaneyso dacwadaha ardayda ka maqnaada dugsiyada xilligan. Halkan kala soco [link].

Si aad u qabsato balan ama uga qeyb qaadato dhageysiga maxkamadda telefoonka ama fiidoowga, ama aad qabto su'aalo ku saabsan balanta maxkamadda ama ka qeyb qaadashada dhageysiga maxkamadda ee qofku tago maxkamadda, la xiriir xogheynta qaaliga dacwadaada loo xil saaray ugu yaraan laba maalmood ka hor dhageysiga dacwadda. Haddii aad adiga ama ilmahaaga uu leeyahay qareen, fadlan xiriir qareenka marka hore, ka hor inta aadan la xiriirin maxkamadda.

Maxkamaddu waxa ay ku dhiri gelineysaa in dhamaan dhageysiyada maxkamadda la qabtoiyada oo meel fog la kala joogo. Si aad uga qeyb gasho dhageysiga telefoon ama fiidoow, ama aad qabto su'aalaha xiriira dhageysiga maxkamadda ee fool ka foolka ah, fadlan la xiriir xogheynta qaaliga Xarunta Adeegga ee (206) 263-8634 ama iimeylka [SCResourceCenter@kingcounty.gov](mailto:SCResourceCenter@kingcounty.gov).

### **Sidee ayaan ula xiriiri karaa haddii uu ilmahaaga xiran yahay, ama qareenka ilmahaaga?**

Shaqaalaha ayaa kuu sheegaya xaaladda xaraga ilmahaaga iyo macluumaadka dhageysiga xiga: 206-263-9595 (24 saac/7 cisho ee todobaadka).

Si aad ula xiriirto qareenka dadweynaha: wac: 206-296-7662.

Si aad ula xiriirto xeer ilaalinta:

- Haddii aad degan tahay Seattle ama waqooyiga I-90, wac: 206-296-9480
- Haddii aad degan tahay koonfurta Seattle ama I-90, wac: 206-205-7485

### **Sidee ayaan uga heli kartaa caawinaad aniga ama ilmahaaga Xarunta Adeegga?**

Xarunta Adeegga waxa ay ku taalaa dhismaha/dabaqa 2aad ee xarunta Garsoorka ee Caruurta iyo Dhalinyarada. Shaqaalaha Xarunta ayaa kaa caawin kara (1) in ay ku xiraan dhalinyarada iyo

qoysaskooda afarta hab ee ugu waaweyn: Caafimaadka Dadweynaha, Dabecadda iyo Cudurada Dhimirka, Waxbarashada Iyo Tababarka, iyo Guriyeynta; (2) kaa caawin kara isku xirka adeegga bulshada; (3) ka caawin kara dhalinyarada iyo qoysaska adeegga ay u baahan yihiin si ay u helaan caawinaadda la xiriirta nidaamka garsoorka ee caruurta. Fadlan la xiriir Xarunta Adeegga ee (206) 263-8634 ama iimeyl [SCResourceCenter@kingcounty.gov](mailto:SCResourceCenter@kingcounty.gov). Saacadaha aan shaqeyno waa Isniin ilaa jimce inta u dhaxeysa 8:30 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo.

---

### **DHAGEYSIYADA CARUURTA LAGA KAXEYO GURIGA**

---

#### **Sidee ayaa ku ogaanayaa maxkamadda aan tagayo iyo goorta aan tagayo?**

- Jadwalka dhageysiga xadgudubka caruurta waxaa la gaarsiiyaa dhamaan dhinacyada ay khuseyso. Qareenkaaga ayaa kula soo xiriiraya dhageysiga ka dib.
- Haddii aad wax su'aal ah ka qabto dhageysiga maxkamadda, fadlan la xiriir qareenkaaga. Haddii ay ku difaacayaan Qareenada Dadweynaha oo aadan garaneyn sida aad ula xiriireyso, fadlan iimeyl u soo dir: [dpd@kingcounty.gov](mailto:dpd@kingcounty.gov) or phone: 206-296-7662 telefoonka 1-844-935-3534.

#### **Maxaan yeelayaa haddii aanan laheyn qareen?**

- Haddii aadan hubin in aad leedahay qareen la xiriir Barnaamijka Waalidiinta ee 206-263-3174. Qof la shaqeeya waalidiinta ayaa kaa caawinaya nidaamka caruurta laga kaxeeyey guriga. Kuwani waa waalid horey u maray dacwadaha noocan ah oo caruurtooda dib loogu soo celiyey. Waalidkan ayaa ku siin kara macluumaad ku saabsan sida looga qeyb qaato dacwadaha ilmaha laga kaxeeyo guriga, kugu caawin kara meelaha aad caawianaad ka heli karto oo kugu xiri kara qareen iyo shaqaalaha adeegga bulshada.

#### **Goorma iyo xagee lagu qabanayaa dhageysiga?**

**Dacwadaha Seattle:** Xarunta Caruurta Iyo Qoyska ee Clark (Clark Children & Family Justice Center), 1211 E. Alder Street, Seattle, WA 98122

#### **DACWADAHA SEATTLE**

Xarunta Garsoorka ee Caruurta iyo Qoysaska (iyo Children & Family Justice Center), 1211 E. Alder Street, Seattle, WA 98122

KALANDARKA	QOLKA	XILLIGA UU BILAABANAYO	JADWALKA
Codsiyada/72 Dhageysiga Hoyga Dadweynaha	4B	08:30 Aroornimo	Isniin ilaa Khamiis
Dhageysiga Meeleynta Caruurta (PPH)	4B	13:30 Galabnimo	Isniin ilaa Khamiis
Dhageysiga dib u eegista	4B	Qirashada	Isniin ilaa Khamiis

Dhageysiga Daaweynta Qoyska	4D	1:30 Galabnimo	Khamiis
Gaar ah – Codsiyada/72s/PPH	4B	8:30 Aroornimo	Jimce
Dhageysi hordhac ah/Xaqiiqo Raadis	4D	8:30 Aroornimo	Jimce

**Dacwadaha Kent:** Xarunta Garsoorka ee Heer Gobol ee Maleng (Maleng Regional Justice Center) 401 Forth Avenue North, Kent, WA 98032

### KENT CASES

Xarunta Garsoorka ee Heer Gobol ee Maleng (Maleng Regional Justice Center), 401 4<sup>th</sup> Avenue North, Kent, WA 98104

KALANDARKA	QOLKA	XILLIGA UU BILAABANAYO	JADWALKA
Codsiyada sharciga ee lacag la'aanta/PPH	1L	8:30 Aroornimo	Isniin
Dhageysi hordhac ah/Xaqiiqo Raadis	1L	1:30 SUBAXNIMO	Isniin
Codsiyada/72 Dhageysiga Hoyga Dadweynaha	1L	8:30 Aroornimo	Talaado iyo Khamiis
Dhageysiga Meeleynta Caruurta	1L	1:30 SUBAXNIMO	Talaado iyo Khamiis
Dhageysiga dib u eegista	1L	Qirashada	Talaado iyo Khamiis
Dhageysiga Daaweynta Qoyska	1L	1:30 SUBAXNIMO	Arbaco
Gaar ah – Codsiyada/72s/PPH	1L	8:30 SUBAXNIMO	Jimce

### SHARIGA DAAWEYNTA AAN KHASABKA AHEYN

**Haddii aan doonayo in aan goobjoog ka noqdo dhageysiga dacwad, sidee ayaa ku ogaanayaa maxkamadda aan tagayo iyo goorta aan tagayo?** Si aad uga qeyb qaadato dhageysiga adiga oo imanaya ama telefoonka, la soo xiriir Margo Burnison 206-263-8574 ama iimeyl u soo dir: [SCITACOURT@kingcounty.gov](mailto:SCITACOURT@kingcounty.gov)

**Sidee ayaan ula xiriiri karaa qof u xiran ITA?** Si aad ula xiriirto qof loo hayo ITA, la xiriir cisbitaalka lagu hayo. Macluumaadka cisbitaalka waxaa la idin siiyey markii qofka la xirayey.

Haddii aad ka tirsan tahay qoyska bukaanka ITA, u Doodaha Qoyska ayaa idin siinaya macluumaadka, adeegga iyo goobaha aad ka heli kartaan caawinaad la xiriirta nidaamka maxkamadda. Waaxda libka iyo Qandaraasyada waxaa lagala xiriiri karaa (206) 477-8517.

**Sidee ayaan ula xiriiraa qareenada ITA?** Waaxda Qareenada Dadweynaha ee Degmada King (DPD) waxa ay u fidiyaan adeeg xagga sharciyada ah dadka qaba cudurada dhimirka ama isticmaalka maandooriyayaasha ee lagu hayo goob caafimaad iyaga oo aan dooran. La xiriir DPD ee 206-477-9727 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Sida uu dhigayo sharciga, Xafiiska Xeer Ilaalinta ayaa matalaya goobta lagu daweynayo ee lagu hayo ee doonaya in qofka la daweeyo iyada oo aan lagu khasbin. Si aad u ogaato dhageysi, la xiriir xeer ilaalinta, ama haddii aad heshay maxakamad uga yeeris, fadlan soo wac 206-744-7774. Waxa lagaa doonayaa inaad ku dhaafto fariin.

**Sidee ayaan ula soo xiriirayaa haddii aan dareensanahay in qof uu madax ka jiran yahay una baahan caawinaad?** Adeegga Gurmada iyo Dhimirka ee Degmada King ayaa qiimeynaya waxyaabaha la xiriira dabeecadda ee qofka iyo haddii iyada oo aan la khasbin doonayo in bukaanka la dhigo isbitaalka sida u dhigayo sharciga RCW 71.05 ee dadka waaweyn iyo sharciga RCW 71.34 ee dhalinyarada.

Shaqaalaha gurmada iyo cudurada dhimirka ayaa hawshan u xilsaaran waxaa loogu yeeraa Gurmada Degdegga ah ee Loo Xil Saaray (DCR). DCR waa shaqo aqoon gaar ah u leh cudurada la xiriira dhimirka oo sameeya qiimeyn guud oo la xiriirta bukaanka.

Shaqaalaha gurmada waa kuwo shaqeeya 24ka saac maalin kasta, 365ka maalmood ee sanadka.

- Soo wax 911 haddii ay xaaladdu tahay mid nolosha qofku khatar ku jirto ama uu qof doonayo inuu is dhaawaco.
- Haddii aysan jirin xaalad khatar ah oo markaas taagan, la xiriir Khadka Gurmada ee 206-461-3222, ama 1-866-427-4747, ama soo booqo [www.crisisconnections.org](http://www.crisisconnections.org).
- Si toos waxa aad ula xiriiri kartaa khadka DRC ee 206-263-9200.